

الرئيس الصومالي يفتتح مستشفى الشيخ زايد في مقديشو في شهر مايو ٢٠١٥

# Kaalmada Imaaraadka ee Soomaaliya

Waa warbixin ay Hay'adda Warfaafinta, Cilmibaarista iyo Hhorumarinta ee Soomaaliyada cusub ay ka diyaarisay kaalmadda dowlada aan walaaha nahay Isutagga Imaaraadka Carabta ay siiso shacabka Soomaaliyeed. Waxa ay warbixintan diiradda saareeysaa kaalinta sharafta leh ee ay Imaaraadku ku leedahay kaalmaynta shacabka Soomaaliyeed.

## Gogol-dhig

Xiriirka Soomaaliya iyo dowladda Isutagga Imaaraadka Carabta waxa uu soo jiray tan iyo xilliyadii xukuumaddii ciidanka ee uu hoggaaminaayey madaxweynihii Soomaaliya ee geeriyooday Maxamad Siyaad Barre, xilligaas oo labada dal ay is dhaafsan jireen booqashooyin rasmi ah, dowlada Imaaraadkana waxaa ay tan iyo waagaasi garab taagneyd dalka Soomaaliya.

Xiriirkii ka dhaxeeyey labada dal ma uusan go'in kadib markii ay dhacday xukuumaddii ciidanka sanadii 1991 markaas oo ay Soomaaliya gashay dagaal sokeeye oo lagu hoobtay. Imaaraadka waxa ay ahayd saxiibka ganacsi ee ugu weyn oo ay Soomaaliya laheyd, waana ay garab taagneyd beryihii samaa iyo kuwii silloonaaba.

Dowlada Imaaraadka waxaa ay u istaagtay gargaaridda Soomaalida waqtiga dhibaatooyinka, gaar ahaanna xilliyada aafooyoinka ama masiibooyinka dabiiciga ah ay dhacaan.waxaa ay Imaaraadka soo dirtay kolonyoyin gargaar ah si loo bad baadiyo kumaan dad ah oo ku barakacay abaarahii dalka ka dhacay, waxaa ay gobolo kala duwan oo Soomaaliya ah ay ka fulisay barnaamijyo gargaar oo looga gol lahaa wax ka qabashada xaaladaha abaaraha iyo in la farxad geliyo Soomaalida, wax qabdkaasi waxaa ka mid ahaa cunnooyin loo qeybiyey dhibbanayaasha ku wax yeeloobay abaaraha, mashaariic af-furin ah oo bilaha Ramadaan lagu soo beegi jiray, qeybinta hillib maalmaha ciidul adxaaga lagu soo aaddiyo, iyo weliba dhar ciid oo loo qeybiyo caruur iyo dad waa wayn oo ka tirsan qoysaska danta yar. Sidoo kale waxaa ay u istaageen gargaarista dad dhaawac ah oo wax looga qaban waayey isbitaaladda dalka kuwaas oo lagu soo daaweeyey Isbitaalo ku yaalla dalka Imaaraadka.

Waxaa sidoo kale ay fulisay mashaariic horumarineed oo ay kamid tahay, ceelal qodis, dhisidda Isbitaalo iyo goobo caafimaad, iyo qalabaynta

Isbitaladaas. Mashaareecdaas waxaashaqo ka helay dad badan oo Soomaaliyeed oo fursado shaqo raadinayay.

Sidoo kale Imaaraadka waxa ay kaalin mug leh ka ciyaartay taageeridda howlaha amaanka dalka, heer maamul goboleed iyo heer federalba. Waxa ay qalab ciidan siiyeen booliska iyo ciidanka xoogga dalka, waxaana ay tababar siiyeen ciidamada gaarka ah ee ilaaliya xarumaha dowladda, iyada oo sidoo kale ka qayb qaadatay ladagaalanka burcad badeeda ka howl gasha xeebaha Soomaaliya, xilli ay sidoo kale marti gelisay shirar ujeedadooda ay tahay cirib tirka burcad badeedka Soomaaliya. Dhammaan kaalimahaas ay dowladda Imaaraadku ka qaadatay wax u qabashada Soomaaliya waxaa amaanay hoggaanka siysaadeed ee dalka iyo shacabkaba.

## Dib u qooraansiga xiriirka somaaliya iyo Imaaraadka:

Marka aan dib u qoraansano sooyaalka xiriika soo jireenka ah ee ka dhaxeeya Soomaaliya iyo Imaaradka, waa xiiriir facweyn oo taabanay dhincya kala duwan oo wax wada qabsi ah, kaas oo qeyb weyn ka qaatay xoojinta xiriirka kadhaxeeya labada dal iyo labada shacab ee walaalaha ah.



الرئيس الصومالي محمد سياد بري يستقبل الشيخ زايد في مقديشو عام ١٩٧٦

## Xiriirka diblumaasiyadda

Xiirirka dilomaasiyadeed ee labada dal waxaa uugaaray horumar lataaban karo xilligii ay labada dal ka kala talinayeen Alle ha unaxariirtee Shiikh Zaayid (Imaaraadka) iyo Jenaraal Barre (Soomaaliya). Waxa ay labada hoggaamiye ahaayeen kuwo si joogta ah isu dhaafsada booqashooyin rasmi ah, oo suurtageliyay xoojinta xiriirka dalalkooda. Booqashooyinkaasina waxa ay ahaayeen kuwo muhiim u ah meel marinta heshiisyo iyo iskaashiyo labada dhinac u dhaxeeya.

Booqashooyinka taariikhda galay ee ay hoggaamiyayaasha labada dal is dhaafsanayeen waxaa tusaale fiican u ah booqashadii uu hoggaamiyaha dowlada Isutagga Imaaraadka Carabta kuyimid magaaladda Muqdisho 25-kii Nofeembar, 1972. Markaas oo si diirran ay u soo dhaweeyeen madaxweynaha jamhuuriyada Soomaaliya Maxamed Siyaad Barre iyo xubno katirsan gollahii sare ee kacaanka iyo xubno iyo mas'uuliyiin kale oo dowladda ka tirsanaa. Booqashada sheikh Zaayid oo qaadatay muddo 4maalmooda ayaa waxaa intii lagu jiray ay Sheikha iyo madaxweynihii Soomaaliya wada jir u kormeereen xarumaha dowladda, xerooyinka ciidamada, iyo magaalooyin dhowr ah oo dalka ka tirsan, halkaas oo uu soo indha indheeyay xaaladihii hormareed ee ka jiray waqtigaas. Markii ay kormeerka soo gaba gabeeyeen, waxa ay labada madaxweyne 28-kii Nofembar ee sanadkaas magaalada Muqdisho ku yeesheen kulan ay ka wada hadleen arrimo badan oo xiriirka dalalkooda iyo iskaashiga quseeya([1])




الشيخ راشد بن سعيد حاكم دبي يستقبل الرئيس الصومالي عام ١٩٧٤

Dhankiisa madaxweynaha jamhuuriyadda marxuum Maxamed Siyaad waxaa uu booqashooyin badan kutagay dalka Isutagga Imaaraadka Carabta,waxaa booqashooyinkaasi kamid ahaa tii 9-11 bisha Julay, 1979 uu ku tegay dalkaas, taas oo qayb ka ahayd socdaal uu madaxweynaha ku marayay qaar ka mid ah dalalka carabta. Waxaana uu madaxweynuhu la kulmay hoggaamiyihii Imaaraadka oo uu kala hadlay xiriika labada dal, iyo xaaladaha kataagan Bariga Dhaxe iyo Geeska Afrika. Intii lagu jiray kulamada labada hoggaamiye ay ku lahaayeen Imaaraadka, waxa uu Shiikh

[1] يوميات الشيخ زايد 1972، منشور في منتدى الإمارات للتداول، بتصرف

Zaayid hoosta ka xarriiqay in uu dalkiisa diyaar u yahay garab istaagga Soomaaliya, si xal looga gaaro dhibaatada dhaqaale ee dalka ka jirta. Isaga oo ballan qaaday in ay dowladdiisu ka qayb qaadan doonto Mashriicyada horumarineed ee Soomaaliya kasocda.([2])

Waxaa jiinka webiga Shabeelle ee magaalada Afgooye ee gobolka Shabeelaha Hoose ku taalla beer caan ah oo uu iska leeyahay Sheikh Zaayid Bin Suldan Al nahyaan, waxaana ay beertaasi tusaale wannaagsan u tahay xiriirka wannaagsan ee kadhaxeeya labada dal iyo labada shacab ee walaalaha ah.



سفير دولة الإمارات يقدم أوراق الاعتماد للرئيس الصومالي

Bishii Abriil 2014 waxaa uu madaxweynaha Soomaaliya Mudane Xasan Sheikh Maxamuud ka guddoomay warqadihii aqoonsiga safiirnimo mudane Danjire Maxamed Axmad Al Cuthman Alxamadi, oo ah danjiraha dowlada Isutagga Imaaraadka Carabta eeSoomaaliya.([3])

Xiriirka ka dhaxeeya Soomaaliya iyo Imaaraadka waa mid ku taaggan dhidibba xooggan oo aas aaskooda uu dhignaa tan iyo markii uu halyey Shiikh Zaayid Bin Suldaan Alle ha unaxariistee uu dhisay dalka Isutagga Imaaraadka Carabta. Imaaraadkuna illaa iyo waqtigaas waxa uu ahaa saaxiibka iyo deeq bixiyaha carbeed ee ugu wayn oo ay Soomaaliya leedahy. Sidoo kale waa saxiibka ganacsi ee ugu muhiimsan Soomaaliya oo ay muddo dheerba lahaayeen iskaashi ganacsi oo aad u xooggan.

Bishii Maarso, 2013 waxaa Imaaraadka boqoday Madaxweynha Soomaaliya Mudane Xasan Shiikh

[2] يوميات الشيخ زايد من سنة 1979م، مقال منشور في موقع عيون دبي، بتصرف

[3] http://www.albayan.ae/across-the-uae/news-and-reports/2014-04-24-1.2108471

Maxamuud, waxana uu halkaas heshiis iskaashi dhaqaale iyo mid ciidanba ah la saxiixday dhiggiisa Imaaraadka. Heshiiskaas oo qodobadiisa ay ka mid ahayd dib u howlgelinta Safaaradii Imaaraadka ee Muqdisho, taas oo ay si dhaqsa ah u dhaqan gelisay dowladda Imaaraadka.([4])

**Xiriirka ganacsiga**

Xiriirka ka dhaxeeya labada dowladood kuma ekeyn oo keliya dhanka diblomaasiyadda, balse waxaa jiray xiriirro kale oo ay ka mid tahay xiriirka ganacsiga, iyada oo ay Soomaaliya siweyn ugu tiirsantahay hadda badeecadaha Imaaraadka laga soo dhoofiyo.

Muddadii uu dagaalka sokeeye ka socday Soomaaliya Magalada Dubai ayaa waxaa ay aheyd furaha xiriirka Soomaaliya iyo jasiirada carabta, kadib markii ay burburtay xukuumaddii Soomaaliya, uuna dalka ku faafay gacan ka hadalkii ba,anaa, ee sababay in malaayiin Soomaali ah ay dalka isaga cararaan, ayaa waxaa jaalliyad weyn oo Soomaaliyeed ay gabbaad ka heleen Dubai.

Waxaa maanta ku nool guud ahaan dalalka Jaziiradda Carabta illaa 900 kun oo dad Soomaaliyeed ah. Waxaa kale oo la tilmaamaa in dowladaha Yeman, Sacuudiga iyo Isutegga Imaaraadka Carabta ay ka mid yihiin dalalka ay ku nool yihiin tirada ugu badan ee qurba joogta Soomaalida. Waxaa xusid mudan in dalka Isutegga Imaaraadka Carabta keligiis ay ku nool yihiin tiro u dhaxaysa 80-100 kun oo Somali ah, kuwaas oo ka mid ah jaaliyadaha Soomaalida ee ugu ballaaran oo dibad joogga ah.

Suuqa Al Diirah ee Dubai ayaa xarrun u ah  qaar badan oo ka tirsan shirkadaha gancsiga ee ay leeyihiin Soomaalida, waxaa sidoo kale qaar badan oo ka

4 Maqaal uu shabakadda Alshahid ku qoray Cabdiraxmaan Ciise, cinwaankiisuna uu ahaa "Kororka ergooyinka diblumaasiyadeed ee Soomaaliya, xaglahooda iyo tusaalooyinooda"

http://arabic.alshahid.net/publications/april2014

tirsan ganacsatada Soomaalida ay maamulaan howlo ganacsi oo isugu jira soo dejin, dhoofin, Baarar cunadda laga cuno, goobo lagu nasto iyo weliba hoteello ku yaalla dalkaas, taas oo ay dheer tahay saddex shirkadood oo xagga duulimaadka ka shaqeeya oo xarrumahooda ugu waa wayn ay ku yaallaan Dubai, sharikadahaas oo fududeeya duulimaadyada tooska ah ee ka dhaxeeya Dubai iyo Muqdisho.

Marka ay timmaado is dhaafsiga badeecadaha asaasiga ah, Dubai waxa ay marin u tahay shirkadaha Bariiska ka soo dhoofsada Hindiya, Bakistaan iyo Shiinaha si ay Soomaaliya ugu soo diraan, waxaa sidoo kale Dubai loo dhoofiyaa wax soo saarka Soomaaliy sida xoolaha nool iyo hilibka loo dhoofiyaa Dubai.([5])

Qoraa Soomaaliyeed oo booqday Dubai ayaa waxa uu si weyn ula yaabay kaalinta wax ku oolka ah oo ay haweenka Soomaaliyeed ka ciyaarayaan dhaqaalaha iyo ka qeyb galkooda xooggan ee dhaqdhaqaaqa ganacsiga ee ka jira suuqayada dahabka Imaaraadka oo ah xarunta ganacsi ee ugu muhiimsan dalkaas, halkaas oo ah wajahadda ganacsiga caalamiga ah. Waxaa uu qoraagu intaasi ku daray; in tirada goobaha ganacsiga oo ay leeyiheen amaba ay maamulaan haweenka Soomaaliyeed ay aad uga badan yihiin goobaha ganacsi oo ay leeyihiin ragga, sidoo kale tirada goobaha ganacsi oo ay haweenka Soomaalida ah ay ku leeyihiin suuqaan aadka u ballaaran waxa ay aad uga badan yihiin goobaha ganacsi ee ay suuqa ku leeyihiin haweenka ka soo jeeda dalalka kale ee caalamka.

Xafiisyada wax dhoofinta ama soo dejinta oo ay maamulaan haweenka Soomaaliyeed ayaa iyagana ka badan kuwa ay maamulaan ragga Soomaalida, isla jeerkaasna waxa ay ka badan yihiin xafiisyada kale oo ay maamulaan haweenka ka

[5] تاريخية بينشبها لجزيرة العربية وشبها لجزيرة الصومالية: استجابة روابط إقليمية مبنية علىأساسالشراكة، ثيودوركاراسيك، ص3-4.

soo jeeda dalalka kale ee caalamka.

Qoraaga waxa uu tilmaamay in heerka dib u dhoofinta ay haweenka Soomaaliyeed dib ugu dhoofiyaan bariga iyo geeska Afrika uu tiro ahaan iyo tayo ahaanba ka sarreeyo heerka wax dhoofinta ganacsatada ragga ah ee Soomaaliyeed.([6])

## Gargaarka aadanaha:

Dowladda Imaaraadka waxaa ay ka mid tahay dowladaha ugu horreeya u gurmashada dadka dhibaateysan, gaar ahaan dowladaha carabta iyo kuwa islaamka, kuwaas oo ay ugu horreyso jamhuuriyadda Soomaaliya. Kaalmada ay hay'adaha gargaarka Imaaraadka ugu deeqaan Soomaaliya ayaa waxaa ay isugu jirtaa qeybo badan oo taabanayo nolosha dadka.

### •Gargaarista dhibbanayaasha masiibooyinka dabiiciga ah

Sanadii 2011 Waxa ay Imaaraadku kaalin muhiim ah ku lahayd dadaalkii gargaarka geeska Afrika, intii ay taagnyd masiibadii ugu xummeyd xagg cunnada ee soo marta gobolka muddo nus qarni ah, Iyada oo dhibaatada abaaraha iyo macaluusha ay si weyn u saameeysay nolosha malaayiin dad ah, Soomaaliyana waxa ay ahayd dalka ugu daran ee ay abaarta sameeysay.

Waxaa ay Imaaraadka si deg deg u billowday dirista kolonyo gargaar ah oo ku wajahan geeska Afrika iyo in ay kaalmo deg deg ah gaarsiiso kummanaan kunoo barakacayaal ah. Kaalmada bani'aadaminimada oo ay Imaaraadka u gudbiysay Soomaaliya sanadihii 2009-2012 ayaa waxa ay ku

---

6 Axmed Cusman, Maqaal lagu daabacay mareegta (Soomaaliya darted), kaas oo cinwaankiiisu ahaa "Haweenayda Soomaaliyeed iyo Islaamka Siyaasadaysan"

http://www.forsomalia.com/index.php/component/easyblog/90-%D8%A7%D9%84%D9%85%D8%B1%D8%A3%D8%A9-%D8%A7%D9%84%D8%B5%D9%88%D9%85%D8%A7%D9%84%D9%8A%D8%A9-%D9%88%D8%A7%D9%84%D8%A7%D8%B3%D9%84%D8%A7%D9%85-%D8%A7%D9%84%D8%B3%D9%8A%D8%A7%D8%B3%D9%8A?Itemid=101

kaceysay qiima ka badan 213 malyuun oo dirham.(7)

Waxaa kormeerayey gaarsiinta kaalmooyinkaas in ka badan 15 hay'adood oo xukuumi ah, iyo qaar kale oo ah kuwa ka shaqeeya howlaha bani'aadaminimada ee dalka Imaaraadka. Waxaana ka mid ahaa hay'adda bisha cas, hay'adda Khaliifa Bin Zaayid ee ka shaqeysa howlaha bani'aadamnimada, hay'adda Zaayid Bin Suldaan Al-Nahayaan, hay'adda Muxamad Bin Raashid al-Maktuum, Hay'adda Sultaan Bin Khalifa Al-Nahayaan ee aqoonta iyo bani'aadamnimada, Sanduuqa Abu Dhabi ee horumarinta, Sanduuqa Muxamad Bin Zaayid ee ilaalinta noolaha, hay'adda Nuur Dubai, jamciyadda Bayt Shariqa Iyo jamciyadda samafalka ee Al-Raxma. waxaa intaas dheeraa howlwadeenadii Imaatraadka ee gargaarka oo ku sugnaa Muqdisho.(8)

Waxaa xusid mudan in kaalmada Bani'aadaminimo ee Imaaraadka ay ka faaiideysteen dhammaan gobolada ay ka kooban tahay jamhuuriyadda Soomaaliya. 20-kiii Agoosto sanadkii 2015 waxaa dekadda Boosaaso ee gobolka Bari gaaray doon sidday 450 tan oo kaalmo cunno ah, iyada oo la fulinaayo soo jeedintee hooggaamiyaha Imaaraadka Sheikh Khaliifa Bin Zaayid Allaha xifdiyee, amarkaas oo ahaa in gacan kaalmo ah la siiyo shacabka Soomaaliyeed dhibtana laga fududeeyo. kaalmooyinkaasi cunnada ah waxay ka koobnaayeen 11 nooc oo cunnada lagama maarmaanka ah.([9])

[7] http://www.sadda.co/Uae/79987/%D9%85%D8%B3%D8%A7%D8%B9%D8%AF%D8%A7%D8%AA-%D8%AF%D9%88%D9%86-%D8%A7%D8%B4%D8%AA%D8%B1%D8%A7%D8%B7%D8%A7%D8%AA-%D9%84%D8%AA%D9%86%D9%85%D9%8A%D8%A9-%D8%A3%D9%81%D8%B1%D9%8A%D9%82%D9%8A%D8%A7.html

[8] http://www.shkmbz.com/vb/showthread.php?t=132819

[9] http://www.albayan.ae/across-the-uae/news-and-reports/2015-08-02-1.2428369



خليفة الإنسانية توزع ألفي سلة غذائية على الأسر المتضررة من الجفاف في الصومال

Dowladda Imaaraadka waxa ay ahayd dowladdii ugu horraysay ee gargaar u fidisay dadkii ku wax yeeloobay abaarahii ku dhuftay gobolada Soomaaliland sandkii 2015.

Hay'adda khlaiifa Bin zaayid waxa ay 23-kii Agosto, 2015 diyaarisay labo kun sallado raashiin ah, oo loo qeybiyay 2000 oo qoys oo ku dhaqan magaalada Hargeysa iyo agagaaraheeda. Kaalmadaasi waxa ay qayb ka ahayd 40000 sallad cunno oo loogu tala galay in loo qeybiyo shacabka Soomaaliyeed, waxa cunadaas ka koobneyd cunnooyinka asaasiga ah sida Burka, Bariiska, Sonkorta iyo Saliidda raashiinka lagu karsado. Hay'adda Khaliifa waxaa ay raashiinkaasi kaalmada ah ka iibisay Suuqyada dalka si loogu qeybiyo qoysaska ka soo barakacay guryahooda kuna xoola beelay abaaraha sida ba'an u saameeyay wax soo saarkii beeraha.([10])



مؤسسة خليفة الإنسانية تسلم الأسر الصومالية المعوزة في المناطق الجبلية / 600 / سلة غذائية.

2-dii Sebtember ee isla sanadkaas waxa ay hay'adda Khiliifa kaalmo gaarsiisay qoysas ku nool Goboladda Somaaliland ee ku wax yeeloobay abaartii baabi'isay xoolahii iyo dalaggii beeraha, gaar ahaanna gobolka Gibiley iyo tuulooyinka hoos yimmaada sida Ceel Biixi, Taysa, Baar Cadaaya, Xernataa iyo Geed Abeera, tuulooyinkaas oo ah meelo aan waddooyin lahayn, ayna adag tahay sida loo gaaro.

Dadka deggan tuulooyinkaan buuraleyda ah oo ay gaartay kaalmada Imaaraadka ayaa muujiyey sida ay ugu faraxsan yihiin kaalmada la gaarsiiyey, sababtoo ah waxa ay ku soo beeggantay xilli ay aad ugu baahnaayeen, waxana ay sidoo

[10] http://alsomalaljadid.com/archives/2657

kale amaaneen kaalmada Imaaraadka iyaga oo sheegay in kaalmadaasi raashinka ah ay kaalin mug leh ka qaadan doonto wax ka qabashada duruufta nololeed ee ay ku jireen. Waxaana ay Alle uga baryeen shacabka Imaaraadka in uu ka ilaaliyo xumaanta iyo masiibooyinka. Si gaar ahna waxa ay u boogaadiyeen hay'adda Khaliifa oo kaalma iyo taageera joogta ah siisa shacabka Soomaaliyeed.([11])

Waxaa dhankiisa ka amaanay kaalmada Imaaraadka Cabdirashiid Ismaaciil Baniin oo ah madaxa xafiiska waxbarashada iyo barbaarinta Hargeysa, waxaana uu sheegay in shacabka Soomaaliyeed aanay illoobi doonin mowqifka Imaaraadka iyo haggidda hoggaankeeda wannaagsan ee ku aaddan taageeridda iyo kaalmeynta shacbiga Soomaaliyeed iyo weliba daboolidda baahida aasaasiga ah ee shacabka, waxaana uu carabka ku adkeeyey in Imaaraadka ay weligeed ahayd dal ku horreeya howlaha u samafalka iyo kaalmaynta shacbiga Soomaaliyeed, halka uu hay'adda Khaliifana uga tilmaamay hay'addii ugu horraysay ee ka jawaabta baaqii ahaa in shacbka Soomaaliyeed la gargaaro, howshaas oo uu ku tilmaamay mid qaddarin mudan.([12]).



الهلال الأحمر الإماراتي يوزع وجبات إفطار جاهزة على أسر فقيرة في مقديشو عام ٢٠١٥

- **Af-furinta dadka sooman**

Barnaamijyada muhiimka ah ee kaalin weyn ka qaatay fududeeynta dhibaatada Soomaalida waxaa kamid ah Barnaamijyada af-furinta dadka sooman oo ay si joogta ah uga fuliso hay'adda Bisha Cas ee Imaaraadka xaafado ka mid ah Muqdisho, gaar ahaan xaafadaha ay ku yaallaan xerooyinka barakacayaasha. Waxa ay caado ka dhigtay hay'adda inay kumanaan qoys

[11] http://alsomalaljadid.com/archives/2915

[12] Isla il wareedkan

oo ah kuwa ay noloshoodu hooseyso u qeebiso cunnooyin kuwa ramadaanka ah oo diyaarsan, iyada oo mudnaan gaar ah siisa mashraaciida sida gaarka ah wax uga qabanaya daruufta dalka ka taaggan iyo xaaladda bini'aadaminimo ee shacabka Soomaaliyeed ay ku noolyihiin.(13)

Sanadihii la soo dhaafay, waxa ay Bisha Cas ee Imaaraadka ka fulisay magaalada Muqdisho mashruuc af-furin ah, waxana ay hay'addu cunnooyin diyaarsan oo af-fur ah u qaybisay in ka badan 5 kun oo qoys inta lagu guda jiray bishii Ramadaan ee sanadkii 2015. mashruucaas oo laga fuliyay Muqdisho ayaa waxaa intii uu socday ka faa'idaystay qoysas sabool ah oo ku dhaqan shan goobood oo ku yaalla magaalada muqdisho.

Cabdi Aadan oo ah mas'uulka loo xilsaaray howsha qeybinta raashinka af-furka ah ayaa yiri ”Kooxda Bisha Cas ee Imaaraadka waxa ay

[13]http://www.emiratesrc.ae/news_details.aspx?p_news_id=353

qorsheeynayaan in ay kaalmooyinka gaarsiiyaan in ka ban shan kun oo ruux oo ku dhaqan xaafadaha Muqdisho” . Waxana uu intaas raaciyey in mashruuca af-furinta ah oo ay maal gelineyso hay'adda Bisha Cas ee Imaaraadka uu beegsanayo dadka aadka u tabaaleeysan ee ka tirsan bulshadda Soomaaliyeed si duruufahooda nololeed wax looga qabto inta lagu guda jira bisha barakeeysan ee Ramadaan.([14])

Xumayd Raashid Al-Shaamisi oo ah ku xigeenka xoghayaha guud ee Bisha Cas ee Imaaraadka u qaabilsan arrimaha kaalmada caalamiga ah ayaa sheegay, in hay'adda ay diyaarisay lacag dheeraad ah si loo ballaariyo mashruuca af-furinta dadka sooman ee dalalka saboolka ah oo ay ugu horreeyso Soomaaliya, si loo garab istaaggo dadka ku wax yeeloobay dagaalada iyo musiibooyinka dabiiciga ah. Waxaa sidoo kale uu tibaaxay in xafiiska hay'adda ee Muqdisho uu iskaashi la

[14]http://alsomalaljadid.com/archives/642

sameeynaayo safaaradda dalka ee ku taala halkaas, si loo fuliyo barnaamijyada Ramadaanka ee loogu tala galay wax ka qabashada baahida ka jirta geyiga Soomaaliya. Wuxuuna farta ku fiiqay In labada dhinac ay ka wada shaqayn doonaan sidii dhibka wax looga qaban lahaa loona hagaajin lahaa nolosha dhabta ah ee ka jirta Soomaaliya. Waxa uu yiri “Waxaa hay’adda usii dheer qeybinta raashiinka diyaarsan qeybinta af-furka Ramadaanka iyo xermooyin raashiin ah oo reeraha ku dhaqan xaafadaha saboolka ah la siinaayo”.([15])

Shacabka Soomaaliyeed ayaa waxa uu si weyn usoo dhaweeyay mashaariicda af-furinta oo ay hayadda Bisha Cas ee Imaaraadka sanad waliba ka fuliso dalka. Guddoomiyaha degmadda Shangaani ee magaaladda Muqdisho Axmed Xassan Yalaxow ayaa amaanay mashruuca af-furinta ah oo hay’adda Bisha Cas ee Imaaraadka ay ka fuliso magaalada Muqdisho. Mr Yalaxow ayaa sheegay in cunnooyin diyaarsan loo qaybiyey qoysaska saboolka ah, isaga oo tilmaamay in ay kaalmadaani ku soo aadday xilligii ay ku habboonayd, maadama ay qoysasku aad ugu baahnaayeen in ay helaan af-fur ku filan xilliga bisha barakaysan ee Ramadaan. Mas’uulkaan ayaa dowladda Imaaraadka ku tilmaamay mid garab istaagtay shacabka soomaaliyeed oo ku jira xaaladda adag.

Dhinnaca kale dadka ka faa’iidaystay mashruucaan af-furinta oo ay maalgelisay hay’adda Bisha Cas ee Imaaraadka ayaa waxaa ay u mahadceliyeen dowladda Imaaraadka, iyaga oo muujiyay in ay u haayaan abaal ballaaran maadaama ay xil iska saartay kaalmeynta iyo daryeelka dadka tabaaleeysan.([16])

[15] http://alsomalaljadid.com/archives/1002

[16] http://alsomalaljadid.com/archives/1025



الهلال الأحمر الإماراتي يوزع لحوم الأضاحي للفقراء في الصومال عام ٢٠١٤

- **Udxiyada**

Waxaa hay'adda Bisha Cas ee Imaaraadka ay meela badan oo caalamka ah ka fulisaa mashaariicda qeybinta udixiyada, waxaana meelaha ay ka fuliso ka mid ah Soomaaliya.

Sanadkii 2014 waxa ay qiimaha udixiyada ee Soomaaliya la siiyey gaartay 450 kun oo Dirham, waxaana ka faa'idaystay dad gaaraya illaa 30 kun oo qof. Qaybinta xoolahaasna waxaa kormeeray xafiiska hay'adda ee Muqdisho oo kaashanaaya hay'adda Geeska Afrika iyo Imaaraadka ee horumarinta iyo dib u dhiska.(17)

Waxaa Muqdisho kaligeed hilibka Udxiyada ka faa'idaystay in ka badan afar kun oo ka tirsan qoysaska saboolka ah ee ku dhaqan xaafadaha sida aadka ah loo deggan yahay, waxana ay tani timid intii lagu guda jiray maalmaha ciidul adxaha barakaysan ee sanadkii Hijriga ee 1435 oo ku beegnaa 2014, taas oo ay ku deeqday hay'adda Bisha Cas ee Isutagga Imaaraadka Carabta oo mashaariic kala duwan ka fulisa dalka Soomaaliya.(18)


الهلال الأحمر الإماراتي يوزع كسوة العيد على أسر صومالية فقيرة

- **Qeybinta dharka ciidda**

Madaxda iyo xubnaha kooxda Imaaraadka ee ku howlanaa

[17] http://rcuae.ae/news_details.aspx?p_news_id=531

[18] http://arabic.alshahid.net/news/117807

gargaarka dadkii barakacyaasha ee ku waxyeeloobay abaarahii ba,anaa ee ku dhuftay bartamaha iyo koofurta dalka Soomaaliya sanadii 2011 ayaa la wadaagay caruurta ku dhaqan xera qaxooti oo ku taalla meel ku dhow garoonka diyaaradaha Aadan Cadde ee Muqdisho farxadda ciidda, iyaga oo u qeybiyay caruurta dharka ciidda iyo alaabaha ay caruurta ku cayaaraan maalmaha ciidda. Xerada ayaa waxaa ku noolaa 750 qoys oo qoyskiiba uu ka kooban yahay 7qof, waxaana ay kooxda u diyaarisay agabka ay caruurta ku ciyaaraan si looga farxiyo, waxaa intaas sii dheer iyaga oo loo qeybiyey xaqal ciidka iyo hadiyado, iyo macmaacn kale. Waxaa halka kaalmooyinkaas lagu qaybinayay goob joog ku ahaa ehelada caruurta haddiyadaha loo qaybiyay. Sidoo kale waxa dadka saboolka ah loo qaybiyay Dharka ciidda oo ay ku deeqeen samafalayaal Imaaraadka u dhashay. Xafiiska ayaa waxa uu kormeeray howsha wax yaabaha aan kor kusoo sheegnay loogu qeybinayey dadka ku nool xeryaha qaxootiga ee ku dhex yaal Muqdisho iyo banaankeeda.

Howshaan samafalka ah ayaa waxa ay qayb ka tahay iskaashiga joogtada ah ee ka dhaxeeya hay'adda, samafalayaasha, muwaadiniinta iyo dadka dagan Dowladda Isutagga Imaaraadka Carabta, si loo joogteeyo xiriirka samafalka ah ee ay samaynayaan dadka naxariista badan oo danaynaya inay gacan kaalmo u fidiyaan dadka dhibaateysan.([19])

Dowladda Isutagga Imaaraadka Carabta iyo hoggaankeeda xil kaska ah iyaga oo doonaya in ay farxad geliyaan laabta caruurta Soomaaliyeed ee ku dhaqan maamulka Soomaliland si ay ula ciidaan caruurta eynigooda ah oo ay dhaleen dadka ladan intii lagu jiray munaasabadda ciidul fidriga barakaysan ee sanadkii 2013, waxa ay hay'adda Bisha Cas

[19] http://www.emaratalyoum.com/ramadan/aiding-people/2011-08-31-1.419483

ee Imaaradka fulisay mashaariic dhar ciid loogu qeybiyey caruurtaas, waxaana mashaariicdaas ka faa'idaystay in ka badan shan kun oo caruur.(20)

14-kii Julay 2015, hay'adda Bisha Cas ee ee Isutagga Imaaraadka Carabta ayaa qaybisay kaalmo ka kooban Sakaatul Fidriga iyo dhar ciid, waxaana loo qaybiyey qoysas sabool ah oo ku dhaqan degmada Cabdicasiis ee dhacda bariga caasimada Muqdisho, iyada oo ay goobjoog ka ahaayeen mas'uuliyiin ka tirsan degmada. Dadka ka faa'ideystay kaalmadaan ayaa waxa ay amaan iyo bogaadin usoo jeediyeen dowlada Imaaraadka, iyaga oo sheegay in dharkaan ciidda ee loo qeybiyey uu qayb weyn ka qaadanaayo farxadda caruurtooda, sida ay taakulada sakaatul Fidriga ee loo qaybiyay ay qeyb weyn uga qaadaneyso fududeynta culeyska nolosha ee saaran.(21)



مؤسسة خليفة للاعمال الإنسانية تتكفل بنقل وعلاج مصابة صومالية بإنفجار مقديشو الاخير

- **Gargaarka dadka dhaawacan**

Waxaa dowladda Imaaraadka ay dusha u ridatay daaweynta dad badan oo ku dhaawacmay qaraxyadii ka dhacay magaalada Muqdisho, gaar ahaan kuwa uu dhaawacoodu halista ahaa oo ay adkaatay in lagu daaweeyo dalka gudahiidsa.

1-dii Maarso 2015, diyaarad ay soo dirtay dowladda Imaaraadka ayaa waxaa lagu qaaday13 qof oo ka mid ahaa dadkii ku dhaawacmay weerarkii ay uruka Alshabaab ku qaadeen hotelka Central ee magaaladda Muqdisho, kuwaas oo la geeyay

[20] http://somalilandtoday.org/2013/09/05/7998

[21] http://alsomalaljadid.com/archives/1422

Imaaraadka si loogu daaweeyo xarumaha caafimaad ee dalkaas. Wasiirka caafimaadka Soomaaliya Xaawa Xassan Maxamed ayaa saxafiyiinta u sheegtay in dhawacyada Imaaraadka loo qaaday xaaladooda waxba looga qaban kari waayey xarumaha caafimaadka ee dalka ku yaalla.(22)

Waxaa sidoo kale hay'adda Khaliifa ay la wareegtay daaweynta marwo Soomaaliyeed oo lagu magacaabo Canab Maxamed oo ku dhaawacantay weerar argagaxiso oo isla bishii Maarso 2015 ka dhacay hotel ku yaal magaalada Muqdisho, waxaana marwadaas la geeyay dalka Imaaraadka, halkaas oo ay ku soo dhaweeyeen wakiillo ka socda hay'adda Khaliifa ee gargaarka aadanaha. Waxaana si buuxda loogu fidiyay wixii ay u baahneyd oo ah gargaar iyo daryeel caafimaad, iyo adeegyo badan oo gacan qabasho ah si looga yareeyo dhibaatada haysatay iyo in uu ilaahey ku manneysto caafimaad. Iyada oo si weyn looga haqab tiray adeegyadii ay u baahneyd iyada iyo wehelkii la socday inta ay joogeen dalka Imaaraadka.(23)

Waxaa 25-kii Juun ee sanadkii 2015 ay dowlada Imaaraadku u soo dirtay Somaaliya diyaarad gaar ah oo ay ku rakiban yihiin qalab caafimaad oo casri ah si ay u qaaddo 2 askari oo ka mid ah kuwii ku dhaawacmay weerarkii ismiidaaminta ahaa oo ay Alshabaab la beegsadeen kolonyo gargaar oo laga leeyahay dalka Imaaraadka oo ku sugnayd Muqdisho. Labada askari ee dhaawacooda dalka Imaaraadka loo qaaday ayaa kala ah Maxamed Xuseen Koori iyo Shariif Xasan Qodax, kuwaas oo ka tirsanaa ilaalada xafiiska Imaaraadka ee Muqdisho. Waxaana askartan la geeyay isbitaal ciidan oo aad u hormarsan kaas oo ku yaalla caasimadda dalka Imaaraadka ee Abu Dhabi. Mas'uul ka tirsan safaaradda ayaa yiri ''Ciidamada Soomaalida ee

[22] http://arabic.alshahid.net/news/120515

[23] http://wam.ae/ar/news/emirates/1395279121303.html

waardiyaha ka ah safaaradda waxaa ay la mid yihiin kuwa Imaaraadka waxaana ay xaq u leeyihiin inaan siino gargaar caafimaad oo dhammeystiran”.([24])



وزارة الخارجية الإماراتية تنظم ورشة عمل حول فرص الاستثمار والتنمية في الصومال

**Mashaariicda horumarineed**

Waxaa mashaariicda bani’aadminimo ee Imaaradka ay dalka ka fuliso barbar socda mashaariic horumarineed oo ay dalka ka waddo.

- **Helitaanka biyo la cabo**

Waxaa guud ahaan kaalmadii ay Imaaraadka ku bixisay gargaarka biyaha intii u dhaxeeysay sanadadii 2009-2013 ay gaareysaa 1.014 Bilyan oo Dirham, taas oo ay ka faa’ideysteen 61 dowladood oo ay ugu horeeyeen Afganistaan, Lubnan iyo Soomaaliya. Marka la fiiriyo ka faa’idaysiga kaalmadaha biyaha iyo faya-dhowrka guud ee ay bixiso Imaaraadka, Soomaaliya waxa ay gashay kaalinta 2-aad Afganistaan ka dib, waxaana kaalmooyinkaas oo guud ahaan ay qiimahoodu gaareen 42.2 malyan, Soomaaliya kaga soo aaday14 malyan oo Dirham.(25)

Waxa ay Soomaaliya ka faa’idaysatay mashaariicda ceel qodista oo ay hay’adda Bisha Cas ee Imaaraadku ka fulisay 19 dowladood oo ay ka mid tahay Soomaaliya, Gaana, kazakhistaan, Jaad, Taylan Sudan, Indunisiya, Albaniya, Togo, Muritaniya, Pakistaan iyo HIndiya, Nijer, Yeman, Afganistaan, Ciraaq, Uganda iyo Masar. Waxaa gudaha Soomaaliya laga fuliyey 1284 mashruuc ceel qodis ah waxaana ku baxay qarash dhan 9malyan iyo 860 kun oo Dirham.(26)

[24] http://alsomalaljadid.com/archives/753

[25] http://www.rcuae.ae/news_details.aspx?p_news_id=256

[26] http://www.rcuae.ae/news_details.aspx?p_news_id=252

Hay'adda Khaliifa ayaa waxa ay ka billawday deegaannada Soomaaliland ee woqooyiga dalka Soomaaliya mashruuc biyo siin ah si looga yareeyo shacabka Soomaaliyeed dhibaatada biyo yarida. Hay'adda ayaa qodday 13 ceel, waxana ay hirgelisay haamo waa weyn oo biyaha lagu keydiyo, si biyaha looga qaado halka loo yaqaano Xunbo Weyne loona gaarsiyo magaaladda Hargeysa iyada oo la adeegsanayo dhuumanka biyaha qaada. Waxaa kale oo ay xarigga ka jartay mashruuc weyn oo biyo lagu soo saaraayo, isla markaana waxa ay dhistay khadkii ugu dheeraa ee magaalada Hargeysa biyaha keena. Mas'uul ka tirsan hay'adda ayaa sheegay in khadka dherarkiisa uu dhanyahay 25km, awooddiisa wax soo saarna ay gaareyso 1milyan oo jirgaan ah maalintiiba, waxaana uu biyo siin doonaa dad gaaraaya 250 kun oo qof oo ku nool magaalada Hargeysa ee waqooyiga dalka.([27])



الرئيس الصومالي يفتتح مستشفى الشيخ زايد في مقديشو في شهر مايو ٢٠١٥

- **dhanka caafimaadka**

Afartii bishii juun 2015 waxaa magaalada Muqdisho laga furay isbitaalka Shiikh Zaayid oo ay maal gelisay dowlada Isutagga Imaaraadka, waxaa isbitaalka lagu qalabeeyey qalab caafimaad oo casri ah kana kooban takhasusyada caafimaad ee kala duwan, iyo qalab sheeybaar oo ah kii ugu danbeeyey ee dunida ku soo kordha. Isbitaalka ayaa waxaa loogu talagalay in wejiga hore uu qaabbilo 300 oo bukaan ah maalin kasta, kuwaas oo helaaya daryeel caafimaad oo lacag la'aan ah.

[27] http://alroeya.ae/2015/02/24/223626/%D8%AE%D9%84%D9%8A%D9%81%D8%A9-%D8%A7%D9%84%D8%A5%D9%86%D8%B3%D8%A7%D9%86%D9%8A%D8%A9-%D8%AA%D8%AE%D9%81%D9%81-%D9%85%D8%B9%D8%A7%D9%86%D8%A7%D8%A9-%D8%A7%D9%84%D8%B5%D9%88%D9%85%D8%A7/

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya oo xarigga ka jaray isbitaalkan ayaa waxa uu sheegay in isbitaalkan loo qalabeeyay si heer sare ah oo ku jaan go'an halbeegga caafimaad ee dunida, waxa uuna adeeg iyo daryeel caafimaad ufidin doonaa muwaadiniinta Soomaaliyeed.

Dhanka kale danjiraha Imaaraadka u fadhiya Somaaliya Muxamed Axmed Cusmaan Xamadi oo ka hadlayay xafalladda furitaanka isbitaalkan ayaa sheegay in Imaaraadka ay ka shaqaynayaan sidii ay adeeg caafimaad ugu suurta gelin lahaayeen dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ay walaalaha yihiin, isla markaana ay goobo caafimaad oo kale ka dhisi doonaan magaalooyinka Afgooye, Marka, Jowhar iyo Baydhaba oo intaba ku wada yaalla Koofurta Soomaaliya, iyada oo looga golleeyahay in adeegga caafimaadka la gaarsiiyo dhammaan dadka Soomaaliyeed ee u baahan.([28])

Dhismaha isbitaalka Shiikh Zaayid ayaa qayb ka ah mashruuca horumarinta jamhuuriyadda Soomaaliya oo ay fulinayso Imaaraadka, waana qayb ka mid ah iskaashiga labada dal ee dhinacyada kala duwan oo uu ka mid yahay caafimaadka.

Waxaa Mashaariicda ay Imaaraadka ka hirgelisay Soomaaliya si diirran u soo dhaweeyay shacabka Soomaaliyeed oo si gaar ah u amaanay mashaariicda dhanka caafimaadka kuwaas oo ay shacabku u arkaan inay qayb ka qaadanayaan badbaadinta nolosha dad u badan hooyooyin iyo dhallaan farabadan oo u dhinta cuduro dunida inteeda kale waa hore laga dabar gooyay. Waxaa

[28] http://sowtalsomal.com/2015/06/05/%D8%A7%D9%81%D8%AA%D8%AA%D8%A7%D8%AD-%D9%85%D8%B3%D8%AA%D8%B4%D9%81%D9%89-%D8%A7%D9%84%D8%B4%D9%8A%D8%AE-%D8%B2%D8%A7%D9%8A%D8%AF-%D9%81%D9%8A-%D9%85%D9%82%D8%AF%D9%8A%D8%B4%D9%88-%D8%A8%D8%AF%D8%B9/

sidoo kale jira isbitaal ay leedahay hay'adda Bisha Cas ee Imaaraadka kaas oo gargaar caafimaad siiya hooyada iyo dhallaanka, waxaana lagu magacaabaa Xannaano, kaas oo ku yaalaa agagaarka Lambar Afar. Isbitaalkaas ayaa waxaa uu adeeg caafimaad siiyaa haween iyo caruur badan oo ku nool magaalada Muqdisho iyo gobolo kale oo dalka kamid ah.([29])

Maxamed Biixi Yoonis oo ah wasiirka arrimaha dibada ee maamulka Soomaaliland ayaa bishii juun 2015 caddeeyey in Imaaraadka ay fulin doonaan dhowr mashruuc oo hormarineed oo ku saabsan dhanka waxbarashada, caafimaadka, korontada iyo gelinta biyo nadiif ah, iyo dhismaha waddooyinka. Dhamaanna waxaa ay noqon doonaan mashaariic wax tar u leh bushada ku dhaqan Somaaliland.([30])

- **Dhanka shaqa abuurista**

Mashaaricda bani'aadamnimada iyo kuwa horumarineed ee dowladda aan walaalaha nahay ee Imaaraadka ay dalka ka fuliso waxa ay fursado shaqo u abuureen dad badn oo Soomaaliyeed, gaar ahaan dhallinyarada oo in ka badan 20 sano shaqo la,aan ahaa, taas oo keentay dhallinyaro badan in ay dalka ka cararaan oo socdaal halis ah u galaan sidii ay ku gaari lahaayeen dalal kala duwan oo ku yaalla Yurub, Khaliijka iyo weliba Afrika, iyaga oo baadi goobaya shaqo iyo nolol ka wannaagsan tii ay ku hesyteen dalka Soomaaliya.

Bishii Abriil sanadii 2014 ayaa madaxweynaha dowlada federaalka ee Soomaaliya oo uu weheliyo mudane Maxamed Alcusmani al Xamadi waxa booqasho ku soo kala bixiyeen gooba badan oo ay Imaaraadka xilligaas ka wadeen mashaariic horumarineed. Madaxweynaha ayaa sheegay in mashaariicda horumarinta ee Imaaraadka ay boqolaal dhallinyaro

[29] http://www.alittihad.ae/details.php?id=61688&y=2015

[30] http://alsomalaljadid.com/archives/408

Soomaaliyeed ah shaqo ka heleen.([31])

Mashaariicda horumarinta Imaaraadka ma ahan kuwo ku kooban Caasimadda Muqdisho ee sidoo kale waxa ay ka socdaan dhammaan gobolada dalka si loo taageero howlaha bani'aadaminimada, dib u dhiska iyo horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha. Sidoo kale dowladda imaaraadka waxa ay Soomaaliya ka caawisaa dhinnacyada kala duwan sida siyaasadda, ammaanka, ciidamada, dhaqaalaha, iyo horumarinta arrimaha baniaadamnimada. Waxaa xusid mudan in ay dowladda imaaraadka tahay dalkii ugu horreeyey oo si deg deg ah oo gacan furnaani ku jirta uga soo jawaabay baaqii madaxweynaha ee ahaa in dib loo dhiso goobaha adeegyada bulshada ee dagaaladii sokeeye ku burburay. Waxa ay dhab ahaantii durbadiiba billawday in ay ka fuliso meelo badan oo dalka ka mid ah mashaariic horumarineed oo waa weyn, kuwaas oo dib loogu soo nooleynayo kaabayaashii dhaqaalaha, isla markaana lagu gacan qabanayo shacabka Soomaaliyeed.

Waxaa la dhihi karaa waxa ay Imaaraadka siisay Soomaaliya amaba ay siineeyso illaa hadda oo ah taageerada gacanta furan iyo kaalinta wax ku oolka ah ee taageeridda mashaariicda horumarineed iyo ka qeyb galkeeda mugga weyn ee xagga dib u dhiska Soomaaliya waxa ay ka tarjumaysaa in xiriirka ka dhaxeeya jamhuuriyadda Soomaaliya iyo Imaaraadka carabta uu yahay mid ka baaxad weyn in qoraal lagu soo koobo oo waxaan ka dheehan karnaa dareenka dhabta ah ee dadka ay xaaladooda hooseyso. Waxaa shacabka Imaaraadka iyo hoggaankooda wannaagsan ay laabta dadka Soomaaliyeed ku leeyihiin boos gaar ah.(32)

[31] http://arabic.alshahid.net/news/116152

[32] http://mogadishucenter.com/blog/2015/05/14/%EF%BA%B7%EF%BB%9C%EF%BA%AE%D8%A7-%D9%84%D9%84%D8%A5%D9%85%D8%A7%D8%B1%D8%AA/

## Kaalmadda dhanka ammaanka

Waxaa dowladda Isutagga Imaaraadka Carabta ay ka caawin jirtay Soomaaliya dhinnaca ammaanka tan iyo markii ay burburtay xukuumaddii ciidanka sanadkii 1991

## • Howlgalkii rejo soo celinta

Marka ay xuumaddii dhexe burbrtay, Imaaraadka waxa ay soo dirtay guuto ciidamadooda lugta ah oo qeyb ka ahaa ciidamada kormeerayaasha Qaramada midoobay, inta uu socday howlgalkii Rejo soo celinta muddadii u dhaxaysay1993-1994. Guutadan ayaa howsha ciidan oo ay haysay waxaa barbar socday cunnooyin fudfud oo ay siinayeen dadka saboolka ah oo ka tirsan bulshada Soomaaliyeed.([33])



سفارة الإمارات في مقديشو تسلم وزارة الأمن معدات عسكرية للشرطة الصومالية

a

10-kii Juun 2015 waxaa ay dowladda Isutegga Imaaraadka Carabta kaalmo ciidan siisay Boliiska Soomaaliyeed, kaalmadaas oo qeyb ka aheyd taageerada hagar la, aaneed ee ay dowladda Imaaraadku siineysay shacabka iyo xukuumadda Soomaaliyeed. Waxana kaalmadaas lagu wareejiyey Booliska, ka dib markii caasimadda gudaheeda lagu qabtay xaflad wayn oo ay goobjoog ka ahaayeen wasiirka ammaanka gudaha Soomaaliya Cabdirasaaq Maxamed Cumar iyo safiirka Imaaraadka u fadhiya Soomaaliya mudane Muxamed Axmed Cusmaan Alxamaadi, iyo Taliyaha Booliska Soomaaliyeed Jenaral Maxamed Sheikh Xasan Xaamud iyo saraakiil kale oo ka tirsan Booliska. Waxa ay kaalmadu ka koobnayd sagaal gawaarida gaashaaman ah, todoba mootooyinka ay

[33] http://www.alittihad.ae/details.php?id=61688&y=2015

Booliska isticmaalaan ah, 10 gaari oo kuwa 4WD ah iyo todoba booyadood iyo hal gaari oo kuwa aanay xabadaha Karin ah oo gaar u ah wasiirka.([34])

Wasiirka ayaa si weyn ugu mahad celiyey dowladda Imaaraadka oo kaalin hormuudnimo ku leh dalka Soomaaliya, iyada oo ka fulisa mashaariic dhinnaca bani'aadaminimada iyo horumarinta oo ay siinayaan xukuumadda iyo shacabka Soomaaliyeed. Waxaa sidoo kale wasiirka uu amaanay kaalmada ciidanka oo ay dowladda Imaaraadku ugu deeqday Booliska Soomaaliyeed, isaga oo sheegay in qalabkaasi uu ciidanka Booliska uu ka caawin doono in shaqadooda amaanka iyo tan adeegga wadanka ay si wacan u gutaan, waxana uu tilaamay in kaalmadani ay tusaale u tahay xiriirka xooggan ee ka dhaxeeya labada shacab iyo labada dal ee walaalaha ah.

Dhanka kale taliyaha ciidanka Booliska ayaa uga mahad celiyay dowladda Imaaraadka kaalmada ay siisay ciidanka Booliska Soomaaliyeed, waxa uuna intaas ku daray in kaalmadaan ay qeyb ka qaadan doonto horumarinta Booliska iyo qalabayntiisa, isaga oo carabbaabay in qalabkan loo kaashan doono u adeeggida bulshada Soomaaliyeed ee dhanka ammaanka.

Dhinnaca kale danjiraha Imaaradka ee dalka mudne Maxamad Axmed Cusmaan Alxamadi ayaa shaaciyay in dalkiisa uu diyaar u yahay in kaalmo dheeraad ah uu siiyo Soomaaliya, iyada oo laga anba qaadayo xiriirka adag ee labada dal ka dhaxeeya. Waxa uu danjiruhu sheegay in kaalmada Imaaraadka uu siiyey Booliska Soomaaliyeed ay qayb ka tahay mashaariicda kaalmada loogu tala gelay in la siiyo lamaaha amniga ee Soomaaliya, taas oo soo jeedintii Shiikh Khaliifa Bin Zaayid al-Nahyaan oo ah hoggaamiyaha dalkaas iyo dardaaranka madaxweyne ku xigeenka dalkaas ahna madaxa golaha wasiirada iyo xaakimka

[34] alsomalaljadid.com/archives/210

Dubai Shiikh Maxamd Bin Raashid Aala Maktuum.([35])



عناصر من حرس قصر الرئاسة يتوجهون إلى الإمارات لتلقى تدريبات عسكرية هناك

- **Tababaridda ilaalada madaxtooyida**

Iyada oo laga amba qaadayo kaalmada amaanka ee dowladda Imaaraadka siiso dalka Soomaaliya, waxaa qaar ka mid ah ilaalada gaarka ee madaxtooyada lagu soo tababaray xeryo ciidan oo dalka Imaaraadka ku yaalla si kor loogu qaado awooddooda iyo xirfadahooda dagaalka, taas oo ka caawineysa in ay si wannaagsan u difaacaan masuuliyiinta iyo shakhsiyaadka muhiimka ah, talaabadaasina waxa ay ahayd mid lagu xoojinaayo ammaanka xarumaha hey'adaha dowladda ah ee caasimadda Muqdisho.

Sagaalkii bishii Abriil, 2015 waxaa Imaaraadka loo duuliyey kooxdii afaraad oo ka kooban 210 askari, kuwaas oo ay magaalada Muqdisho ka qaadday diyaarad gaar ah si ay u helaan tababar heerkiisa sarreeyo. Danjiraha Imaaradka u fadhiya Soomaaliya Mudane Muxamed Axmed Cusmaan xamaadi ayaa sheegay in dalkiisa ay tababar siiyeen ilaa sadax qeybood oo katirsan ilaalada madaxtooyada sanadii 2014, waxaa uuna intaasi ku daray in imaaraadka madaama ay tahay dal howlo horumarineed ka wada Soomaaliya ay kaalin weyn ka qaadaneyso tababarka ciidamada ammaanka ee Soomaaliya. Waxaa sidoo kale aan ugu deeqnay buu yiri gawaarida gaashaaman iyo kuwa aanay xabaddu karin si ay u isticmaalaan masuuliyiinta heerka sare ee dowladda federaalka ah.([36])

[35] http://alsomalaljadid.com/archives/210

[36] http://arabic.alshahid.net/news/121290



توقيع مذكرة تفاهم عسكري بين الصومال والإمارات

## Kaalmadda xagga ciidanka

Waxaa dowladda Isutegga Imaaraadka Carabta ay qalab ciidan ku taageeri jirtay mudadii ay dalka ka jirtay xukuumadii ciidanka ee burburtay, iyada oo siisay kaalmooyin ciidan oo ay ka mid yihiin 12 diyaaradaha dagaalka oo loo yaqaan **Hocker hunter** ee lagu sameeyey dalka Britain, kuwaas oo ay Soomaaliya u adeegsatay howlgaladii ciidan ee dalka lagu difaacayey.

Waxaa ay bishii Nofembar ee 2014 Imaaraadaka iyo jamhuuriyadda Soomaaliya kala saxiixdeen heshiis is afgarad ah oo ku saabsan dhanka iskaashiga ciidanka. Waxaa sidoo kale xukuumadda Soomaaliya la guddoonsiiyey xilliyo kala duwan 10 gaari oo kuwa ciidamada ah nooca loo yaqaan **Pick up** iyo 15 ka tirsan gawaarida aan xabadaha karin oo loogu tala galay in ay isticmaalaan masuuliyiinta dowlada federaalka Iyo 5000 oo dharka ciidamada ah iyo weliba dayacatir ay ku sameeyeen xafiisyada ciidanka ilaalinta badaha. ([37])

5-ta bishii May sanadkii 2015 waxaa magaalada Muqdisho laga furay xarun lagu tababaro ciidamada xoogga dalka waxaana maalgeliyey dowladda Imaaraadka. Madaxweynaha Soomaaliya ayaa hadal uu ka jeediyey munaasabadda furitaanka xarruntaasi waxa uu si weyn ugu amaanay kaalmada Imaaraadka, isaga oo yiri “Dowladda Isutegga Imaaraadka Carabta waa dowladdii ugu horreeysay oo ka jawaabtay baaqeena isla markaana naga kaalmeysa dhinnacyo badan oo kala duwan, ma aha keliya dhanka ciidamada ee waxa ay gacan weyn ka geeysatay dhanka bani’aadaminimada iyo horumarinta bulshada”.

[37] http://www.alittihad.ae/details.php?id=61688&y=2015

Danjiraha Imaaraadka Mudane Muxamed Axmed Cusmaan Al-Xamadi ayaa dhankiisa sheegay in dowladda Imaaraadka ay Soomaaliya ka gacan siineyso sidii kor loogu qaadi lahaa awoodda ciidanka iyada oo loo marayo tababaridda ciidamada iyo qalabeyntooda.(38)



تخرج الدفعة الثالثة من القوات المسلحة من معسكر التدريب الإماراتي في مقديشو

Waxaa 20-kii bishii Janaayo ee sanadkaan 2016 xerada tababarka ciidamada qalabka sida ee Muqdisho oo ay dhistay dowladda Imaaraadka ka qalin jebiyey qeybtii sedaxaad oo ciidamo Soomaaliyeed ah, waxaana goobjoog ka ahaa xafladdii qalin jebinta qeybta seddaxaad madaxweynaha jamhuuriyadda Soomaaliya Xasan Shiikh Maxamuud iyo danjiraha Imaaraadka u fadhiya Soomaaliya mudane Maxamad Axmed Cusmaani al-Xamadi. Tirada askarta qalin jebineysa ayaa gaareysay 307 askari oo tabarka dhammeystay. Sidoo kale waxaa isla xarunta tababarka ciidamada qalabka sida ee Muqdisho ka qalin jebiyay 57 askari oo ka tirsan ciidamadda gaarka ah.(39)

Dowlada Isutegga Imaaraadka Carabta waxa ay ka mid tahay deeq bixiyayaasha ugu cad cad ee taageera ciidanka Soomaaliya. Bishii Oktoobar ee sanadkii 2015, waxa ay dowladaha Soomaaliya iyo Imaaraadka kala saxiixdeen heshiis dhigaayey in Imaaraadka ay bixiyaan qeyb ka mid ah mushaarka ciidamada. Waxaa heshiiskaas dhanka Soomaaliya u saxiixay wasiirka maaliyadda mudane Maxamad Aadan Fargeeti, halka dhanka Imaaraadkana uu u saxiixay danjiraha Imaaraadka u fadhiya Soomaaliya mudane Maxamad Axmed Cismaani al- Xamadi. Wasiirka ayaa sheegay in uu aad ugu rejo weyn yahay in heshiiskan ay labada dowladood kala saxiixdeen uu ciidamada u dammaanad qaadi

[38] http://arabic.alshahid.net/news/121966

[39] http://alsomalaljadid.com/archives/6352

doono helitaanka mushaar joogta ah.(40)

Tallabada dowladda Imaaraadka ay ku bixineyso qeyb ka mid ah mushaarka ciidamada dowladda ayaa xal u noqon doonta mushkiladdii dib u dhaca mushaaraadka ciidamada, taas oo saameyn aan wannaagsaneyn ku laheyd howlaha xagga ammaanka.

25 bishii Maarso sanadkii 2015 waxa ay Imaaraadka kaalmo ciidan oo isugu jirta gawaarida gaashaaman iyo Cabdi Bileyaalba ku wareejisay maamulka Jubba ee Koofurta Soomaaliya. Hoggaamiyaha maamulka Juba Axmad Madoobe ayaa sheegay in Imaaraadka ay ballan qaadday in ay maamulkiisa ka caawinayso xagga dhismaha ciidanka, isaga oo u mahad celiyay dowladda Isutegga Imaaraadka Carabta, oo uu tilmaamay in kaalmada ay siisay maamulkiisa ay gacan ka geysan doonto dagaalka lagula jiro dhaqdhaqaaqa Alshabaab ee ku xiran ururka Alqaacidda.(41)

Waxaa 17-ka bishii Oktoobar sanadkii 2015 ay safaaradda Imaaraadku ku wareejisay xukuumadda Soomaaliya Doomaha dheereeya si ay Ciidamada Badda Soomaaliya ugu suurta gasho in ay gutaan shaqadooda ku aaddan ilaalinta biyaha Soomaaliya. Munaasabad ka dhacday Muqdisho ayuu safiirka Imaaraadka ee Soomaaliya Mudane Cusmaani Al-Xamadi uu doomahaasi dheereeya kula wareejiyey wasiirka ammaanka gudaha Mudane Cabdirasaaq Cumar Maxamad. Waxaa sidoo kale munaasabadda wareejinta doomaha goobjoog ku ahaa taliyaha ciidanka Booliska Soomaaliyeed Jeneraal Maxamad Shiikh Xasan Xaamud.(42)

[40] http://alsomalaljadid.com/archives/4199

[41] http://arabic.alshahid.net/news/122191

[42] http://alsomalaljadid.com/archives/4216



قراصنة صوماليون

**Dadaalka Imaaraadka ee la dagaalanka Burcad Badeedka**

Waxaa ay dowladda Isutegga Imaaraadka Carabta ay qabatay sanadihii lasoo dhaafay shirar isdaba joog ah oo looga hadlaayay sidii looga hortagi lahaa Burcad Badeedda oo halis gelisay dhaqdhaqaaqa Maraakiibta isaga goosha badweynta Hindiya iyo Badda Cas, taas oo raad aan wannaagsaneyn ku reebtay caalamka guud ahaan gar ahaanna somaaliya.

Wasiiru dowlaha arrimaha dibadda Imaaraadka Dr Anwar Maxamad Qarqaash ayaa sheegay in dalkiisa uu lacag dhan 3.6 milyan oo Dirham uga qeyb qaadanayo sare u qaadista awoodda ciidamada badda iyo ilaanta xeebaha ee Soomaailyeed si looga hor tego falalka burcad badeednimada ee ka dhaca biyaha gobolka, waxana ay Imaaraadku tallaabadaas u qaadaysaa si ay uga soo dhalaasho kaalintii ay ka sugayso dunida, marka loo eego ka qayb galka howlaha gobalka. Hadalkan ayaa uu wasiiru dowluhu sheegay xilli uu wasiirka arrimaha dibadda ee Imaaraadka ku metelayay munaasabadda furitaanka shirkii 2aad ee la dagaalaanka Burcad Badeeda oo lagu qabtay magaalada Dubai 28-kii Juun, 2012. Imaaraadka waxa ay quud darreyneysaa in wax laga ogaado waxa ay salka ku heysao burcad badeednimada ka dilaacday xeebaha Soomaaliya iyo wixii ka dhashay oo halista ku ahaa bani'aadaminimada, taas oo si toos uga muuqaneysa dhibaatada heysata Badmaaxyaasha ay af duubeen Burcad Badeedda iyo qoysaskooda, iyada oo heerka khatarta ay sare u kacday intii lagu guda jiray sanadkii 2011. Mudane Qarqaash ayaa waxa uu carabka ku dhuftay baahida loo qabo in la jiheeyo dadaalka si loo gaaro hoggaan goboleed oo awood badan qeybna ka ah

dagaalka caalamiga ah ee ka dhanka ah Burcad Badeedda, waxaana ay taas la xiriirtaa dhabnimada ku saabsan in xalka uu ka imaan karo gobolka, waana midda keliya ee xal waara looga gaari karo arrintaan.(43).

Bishii Sebtember 2013 waxa ay dowladda Imaaraadku ay qabatay shirkii 3-aad ee la dagaalanka Burcad Badeedda. Wasiirka arrimaha dibadda ee Imaaraadka Shiikh Cabdalla Bin Zaayid Al Nahyaan ayaa yiri intii uu shirka socday ”Kaalinta Imaaraadka kuma koobna oo keliya la dagaalanka Burcad Badeedda ee waxa ay dowladda federaalka ah ee Soomaaliya kala shaqeysaa sidii loo dhisi laaha awoodaha dowlad wax gal ah oo ka hortagta burcad badeednimada, waxa ay sidoo kale si xoog leh u taageertaa dadaalka dunida ee la,dagaalanka burcad badeednimda. Dowladaha carbeed waxa ay dedaal dheeraad ah oo la jaan qaadaya dedaalka caalamiga ah ku bixiyaan sidii nabad iyo deganaasho loogu soo dabaali lahaa xeebaha Soomaaliya. Xukuumadda Imaaraadka waxa ay ka qayb qaadaneysaa dhisidda awoodda Soomaaliya, si loo xoojiyo ammaanka, iyada oo loo marayo kaalmada aan xadka laheyn ee dhanka maaliyadda iyo kaalmooyinka horumarineed ee la siinayo dalkan aanu walaalaha nahay si uu isaga oo bad qaba ugu soo laabto dunida inteeda kale, uuna si wax ku ool ah uga qeyb qaato iskaashiga horumarin goboleed.(44)

Waxa ay Imaaraadka taageeraysaa howsha dejinta istiraatijiyad badeedka Soomaaliya, taas oo ka shaqeyneysa ilaalinta xeebaha dalkaan, kaalmadaasi oo ay ka mid tahay in la taageero dhammaan qorshayaasha dhismaha awoodaha badeed. Wasiirka arrimaha dibadda Imaaraadka ayaa sheegay in ay dowladdiisa rumeysan tahay in la caawiyo Soomaalida si ay

[43] http://www.emaratalyoum.com/local-section/other/2012-06-28-1.495174

[44] http://www.albayan.ae/across-the-uae/news-and-reports/2013-09-13-1.1958967

iyaga ugu istaaggaan howshaas, isla markaana lagu saacido qalabka tababarka iyo maal gelinta ciidamada ammaanka, si ay mustaqbalka u hantaan howsha ammaanka iyo deganaashaha Soomaaliya.(45)

Shirkii 4-aad ee la dagaalanka burcad badeednimada ee lagu qabtay magaalada Dubai intii u dhaxeysay 29-30 Oktoobar sanadkii 2014 waxaa wasiirka arrimaha dibadda ee Imaaraadka Shiikh Cabdalla Bin Zaayid uu ku nuuxnuuxsaday in la dagaalanka burcad badeednimada ay Imaaraadka u leedahay mudnaan gaar ah. Maqaal uu qoray oo uu uga hadlayey munaasabadii ay dowlada Imaaraadka ku marti gelissay shirkii 4-aad ee ladagaalanka burcad badeednimda ayuu Shiikh Cabdalla ku xusay in ay dowladdiisa u taaggan tahay in ay kaalin hormuudnimo ah ka ciyaarto iskaashiga gobolka iyo kan caalamiga ah, iyada oo dedaal xiriir ah ku bixineysa xoojinta wacyi gelinta ku saabsan burcad badeednimada.Waxaa uu intaas raaciyey "Dowladdeenu waxa ay ka qeyb qaadaneysaa howsha kooxda xiriirka la dagaalanka burcad badeednimada xeebaha Soomaaliya taas oo ay ka tirsan yihiin 80 dowladood, ururro caalami ah iyo ururo ka shaqeeya arrimaha badda. Waxaana si wada jir ah howshaan madax uga ah dalalka Imaaraatka Japanka iyo Siishilis. Waxaana hoggaanka mideysan ee la dagaalanka burcad badeednimada ay ujeedadiisa tahay joojinta burcad badeed nimada ama yareyntooda".(46)

Guud ahaan kaalmada kala duwan ee Imaaradka ay siineyso jamhuuriyadda Soomaaliya waxa ay tusaale cad u tahay deeqsinimada hoggaanka wannaagsan ee dowladda Imaaraadka iyo shacabkeeda gacanta furan. Waxa ay Imaaraadka gashay kaalinta 1-aad ee bixinta

[45] المصدر السابق

[46] http://www.albayan.ae/one-world/arabs/2014-10-29-1.2231861

kaalmooyinka guud ahaan caalamka sandkii 2014, taas oo loo fiirinayay dakhligeeda qaran, waana sandkii labaad oo si isku xigta ay u gasho dowladda Imaaraadka kaalintaas. Waxa uu gaaray xaddiga kaalmooyinka horumarineed ee rasmiga oo ay Imaaraadka bixisay ku dhawaad **4.89 bilyan** oo Doolarka Maraykanka ah, waxana ay tiradaas ka tahay dakhliga qaran ee imaraadka 1.17%.

Guddiga kaalmada horumarineed ee raacsan ururka iskaashiga dhaqaale iyo horumarinta ayaa ku dhawaaqay in waxa ay Imaaraadka bixisay sanadkii 2014 uu yahay tiradii ugu badneyd ee kaalmo horumarineed oo rasmi ah oo ay dowladi bixiso marka loo eego dakhligeeda qaran. Shiikh Maxamad Bin Raashid Aala Maktuum oo ah madaxweyne ku xigeenka dalkaas ahna Raiisul wasaarah ahna xaakimka Dubai ayaa mar uu ka faaloonayey arrintaa waxa uu yiri ”Sababta aan uga hormarnay dowladaha caalamka marka laga hadlaayo kaalmada waxaa ay tahay in madaxweynaha dalkeenna Mudane Shiikh Khaliifa Bin Zaayid Al Nahyaan uu yahay qofka ugu horreeya dunida xagga wax bixinta. Waxaa wadadaas billaabay Shiikh Zaayid, iyada oo Khaliifa iyo walaaladiisna ay sii wadeen geeddi socodkii wax bixinta. Maanta waxaan leenahay in kabadan 38 hay’adood oo ka shaqeeya dhinnaca bani’aadannimada kuwaas oo samaha ku abuura dunida dacalleeda”.([47])

[47] http://alsomalaljadid.com/archives/1740


UAEHISTORY.COM

الرئيس الصومالي محمد سياد بري يستقبل الشيخ زايد في مقديشو عام ١٩٧٦





الشيخ راشد بن سعيد حاكم دبي يستقبل الرئيس الصومالي عام ١٩٧٤





الشيخ محمد بن زايد  يستقبل الرئيس الصومالي

Warbixintaan waxaa diyaarisay The New Somalia foundation for Media, Research and Development, webiste: [www.alsomalaljadid.com](http://www.alsomalaljadid.com) , Email: [alsomalaljadid@gmail.com](mailto:alsomalaljadid@gmail.com)



الرئيس الصومالي يستقبل في مقديشو وزير خارجية الإمارات الشيخ عبد الله بن زايد



سفير دولة الإمارات يقدم أوراق الاعتماد للرئيس الصومالي



الرئيس الصومالي يفتتح مستشفى الشيخ زايد في مقديشو في شهر مايو ٢٠١٥

Warbixintaan waxaa diyaarisay The New Somalia foundation for Media, Research and Development, webiste: [www.alsomalaljadid.com](http://www.alsomalaljadid.com) , Email: [alsomalaljadid@gmail.com](mailto:alsomalaljadid@gmail.com)



سفير الدولة في مقديشو يقيم مأدبة عشاء على شرف نائب رئيس وزراء الصومال




توقيع مذكرة تفاهم عسكري بين الصومال والإمارات